Dedicated to Excellence
Cherry Creek Schools

Ku biirista Bulshada Dugsiyada Cherry Creek

Soo dhawoow! Waxaan rajaynaynaa inaan ku diwaangelino ardaydaada mid ka mid ah dugsiyadeena iyo inaan qoyskaagu ku soo biiro bulshada Dugsiyada Cherry Creek. Dukumeentigan waxaa loogu talagalay in lagu siiyo macluumaadka aasaasiga ah ee ku saabsan Dugsiyada Degmada Cherry Creek, waxbarashada guud ee K-12 ee Ameerika, iyo macluumaadka gaarka ah ee dugsiga ilmahaaga.

Sida La Iskaga Diiwaan Geliyo Dugsiyada Cherry Creek

Ardayda cusub ee xiisaynaysa inay iska diiwaan geliyaan xanaanada caruurta ilaa fasalka 12aad waxay u baahan yihiin inay si fudud u isticmaalaan nidaamka diiwaangelinta khadka tooska ah oo si fudud loo isticmaali karo. Ardayda hada dhigata uma baahna inay dib isu diiwaangeliyaan sannad kasta. Isdiiwaan gelinta xanaanada waxaa la heli karaa laga bilaabo February 1deeda, isdiiwaangelinta dhamaan fasaladana waxay bilaabmaysaa March 1deeda sannad kasta.

Habka Diiwaangelinta

Talaabada 1: Ka samee akoontada diiwaangelinta qoyska ee registrationka.powerschool.com/family. Waxaad u baahan doontaa ciwaan email sax ah si aad u samaysato akoonkaaga

Talaabada 2: Marka la sameeyo aKoontada Diiwaangelinta Qoyska, waxaad awoodi doontaa inaad diwaangeliso ardaydaada. Waxaad u baahan doontaa inaad soo geliso koobiyada elektarooniga ah ee dukumentiyadan soo socda si aad u dhamaystirto nidaamka diiwaangelinta arday kasta:

- Shahaadada dhalashada (oo la turjumay hadii aanay Ingiriisi ahayn) ama mid ka mid ah kuwan soo socda:
  - Shahaado isbitaal oo saxeexan oo shaabad rasmi ah leh
  - Rasiidka dhalashada oo sheegaya in shahaada dhalashada bedelkeeda la dalbaday
  - Baasaboor sax ah
- Diiwaanka talaalka - Fadlan soo gali diiwaanka talaalka oo DHAMEYSTIRAN (dhamaan bogagga, hore iyo gadaal).
  - Sharciga Colorado wuxuu u baahan yahay dugsiyadu inay haystaan diiwaan cusub oo arday kasta xaaladdiisa talaalka ee ka hortagga cudurrada faafa ee laga hortagi karo.
- Cadaynta cinwaanka - Liiska dukumentiyada la aqbali karo yaa laga heli karaa halkan www.cherrycreekschools.org/Page/13767.
- Waxaa laga rabaa waalidka iyo masuulka kaarka aqoonsiga ee ay Dawladu bixiso oo Sawirka leh
  Fiiro gaar ah: Hadii aadan awoodin in aad iskaan ka sameyso dukumentiyadaada, waxaa jira apps bilaash ah oo online ah oo u suurtagelinaya taleefankaaga casriga ah inuu u adeego sawir qaade ahaan. Ama waxaad si fudud ugu sawiri kartaa dukumentiyada taleefankaaga casriga ah. Hubi in magaca ardaygaagu uu ku yaal dhamaan dukumeentiyada iyo in dhamaan macluumaadka ay cad yihiin si si fudud loogu akhriyi karo. Taageero dheeri ah, waxaad booqan kartaa xafiiska ogolaanshaha si dukumentiyada loo soo geliyo.

Talaabada 3: Waxaad iimayl ka heli doontaa Diiwaangelinta PowerSchool ka dib marka ardaygaaga laga diiwaan geliyo degmada. Iimaylku wuxuu ka koobnaan doonaa macluumaadka ardaygaaga iyo tilmaamaha tilaabooyinka xiga.

Dedicated to Excellence
Cherry Creek Schools

Xafiiska diiwaangalinta degmadu wuxuu leeyahay hal xafiis oo weyn iyo xafiis kale

Xafiiska Diiwwwaangalinta Furan Isniin-Imco, 7:30subax. – 4galabnimo.	5416 S. Riviera Way Aurora, CO 80015
Xafiiska Kale Diiwaangalinta Furan Talaadada iyo Khamiista laga bilaabo 7:30subaxdii. – 4galabnimo	12600 E. Jewell Avenue Aurora, CO 80012 (Waxaan ku jirnaa dhismo wareeg ah oo ku yaal meesha dambe ee baarkinka ee Dugsiga Dhexe ee Prairie)

Nagala Soo Xiriir:
Taleefanka: (720) 554-4550
Email: admissions@cherrycreekschools.org

Xarunta Ku Laabashada Dugsiga

Markaad si fiican isku diiwaan geliso, waxaan ku dhiirigelinaynaa adiga iyo qoysaska inaad soo booqataan boga onlaynka ee ku soo laabashada Dugsiga si aad u fiiriso macluumaadka saxa ah,ee cusub ee sannad dugsiyeedka hada socda wixii la xiriira gaadiidka, quraacda iyo cuntooyinka qadada, talaalada, ciyaaraha fudud iyo hawlaha, farsamada, iyo amniga iyo su'aalaha amniga. Macluumaadkan onlaynka ah waxaa laga heli karaa halkan www.cherrycreekschools.org/backtoschool.

Saacadaha Dugsiga

* *Isniinta ilaa Jimcaha hadii aan si kale loogu xusin jadwalka sannad dugsiyeedka hada*

Dhamaan Dugsiyada Hoose: 8:00 subaxnimo ilaa 2:45 galabnimo
(Waqti hore oo laga baxo Arbaco kasta: 8:00 subaxnimo ilaa 1:45 galabnimo)

Dhamaan Dugsiyada Dhexe: 8:50 subaxnimo ilaa 3:45 galabnimo

Dhamaan Dugsiyada Sare: 8:20 subaxnimo ilaa 3:30 galabnimo

Macluumaadka Muhiimka ah ee Dugsigaaga

Magaca Dugsiga:
Dugsiga u Dhaw:
Magaca Maamulaha:
Khadka Taleefanka muhiimka ah:
Khadka imaanshaha (si aad uga warbixiso maqnaanshaha ama daahitaanka):
Waybsaydka Dugsiga:
Waybsaydka degmada: www.cherrycreekschools.org
Sinnaanta, Dhaqanka & Xiriirka Ka-qaybgalka Bulshada:

Dedicated to Excellence
Cherry Creek Schools

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Dugsiyada Degmada Cherry Creek iyo Waxbarashada Dadweynaha K-12 ee U.S.

Ku saabsan Degmada Dugsiyada Cherry Creek

Degmada Dugsiyada Cherry Creek waa degmada afraad ee ugu weyn dugsiyada dadweynaha ee Colorado, oo u adeegta in ka badan 53,000 arday (kindergarten ilaa fasalka 12aad) ee guud ahaan sideed degmo ee Degmada Arapahoe. 67-da dugsi ee xaafadaha mid walbaa waxay u adeegtaa bulsho kala duwan mid kasta waxay diirada saartaa hal ujeedo: ku dhiirigelinta arday kasta inuu fikiro, inuu barto, si uu u gaaro, iyo inuu daryeelo. Jadwalka Dugsiyada Cherry Creek waxa uu raacayaa sannad dugsiyeedka waxbarashada ee Ameerika kaas oo sida caadiga ah bilaabma August oo dhamaada dhamaadka May. Dugsiyadu waxay qaataan nasasho gaaban xilliga dayrta - fallka (Fasaxa deyrta-winterka), December (nasasho jiilaalka) iyo March (fasaxa gu'ga), iyo sidoo kale fasax dheer oo xagaaga-summerka ah (June iyo July). Jadwalka sanad dugsiyeedka hada waxaa laga heli karaa halkan https://www.cherrycreekschools.org/Page/2#calendar1/20230706/month,

Waxbarashada Dadweynaha ee Ameerika

Dalka Maraykanka, caruurtu waxay dhigan karaan dugsiga dadweynaha lacag la'aan laga bilaabo kindergartenka ilaa dugsiga sare. Nidaamka waxbarashada ee Maraykanka yaa guud ahaan loo qaybiyaa sadex marxaladood: waxbarashada hoose,Dhexe, iyo sare, iyo dugsiga sare kadib. Waxbarashada aasaasiga ah waa qasab, laakiin waxbarashada dugsiga sare kadib (sida kuliyada ama barnaamijyada xirfadaha) waa ikhtiyaari. Waxbarashada rasmiga ahi waxay socotaa ilaa 12 sano, sanad dugsiyeed kastana waxaa loo yaqaan fasalada. Inta badan caruurtu waxay waxbarashadooda ku bilaabaan xanaanada markay da'doodu tahay 5 ama 6, waxayna waxbarashadooda ku dhameeyaan fasalka 12aad markay da'doodu tahay 17 ama 18 jir.

Waalidiinta yaa ka mas'uul ah keenista qalabka aasaasiga ah sida buugaagta wax lagu-qoro, qalinka, iyo dharka. Hadii qoysasku u baahan yihiin in laga caawiyo iibsashada alaabta dugsiga, fadlan la hadal macalinka ama maamulaha ilmahaaga. Dugsiyada Cherry Creek, dhamaan qoysasku waxay xaq u leeyihiin inay helaan quraac iyo cunto qado ah oo bilaash ah markay buuxiyaan Foomka Codsiga Cuntada oo laga heli karo halkan: https://www.cherrycreekschools.org/Page/4041.

Qaamuuska Erayada Caadiga ah ee Lagu Isticmaalo Waxbarashada Dadweynaha ee Ameerika iyo Dugsiyada Cherry Creek

- **Adeegyada:** Isbedelada taageera baahiyaha gaarka ah ee ardayga ee fasalka, sida siinta ilmaha naafada ah wax akhriska wakhti dheeraad ah si uu u dhamaystiro imtixaanka.
- **Meelaynta Sare (AP):** Koorsooyin heer jaamacadeed ah oo lagu bixiyo heerka dugsiga sare. Ardaydu waxay qaadan karaan koorsooyinka AP oo waxay heli karaan buundooyinka kuleejka markey helaan buundooyin lagu qanco imtixaanadooda.
- **Taageerada Luqada Ingiriisiga (ELS):** Barnaamij si gaar ah loogu talagalay in lagu baro xirfadaha luqadda Ingiriisiga bartayaasha fasalka, sida akhriska iyo qoraalka.
- **Bartayaasha Luuqadaha Badan (ML):** Ardayda afkooda aasaasiga ahi aanu ahayn Ingiriisi waxaana laga yaabaa inay u qalmaan taageerada dheeraadka ah ee fasalka dhexdiisa.
- **Dugsiyada saree ee u dhaw:** Dugsiyada Cherry Creek waxay u qaybsan yihiin lix goobood oo ay go'aamiyaan dugsiyada hoose iyo dhexe ee "u dhaw" mid kasta oo ka mid ah lixdayada dugsiyada sare waa: Dugsiga Sare ee Cherry Creek; Dugsiga Sare ee Grandview; Dugsiga Sare ee Eaglecrest; Dugsiga Sare ee Smoky Hill; Dugsiga Sare ee Overland; Dugsiga Sare ee Cherokee Trail.

- **Celceliska Dhibcaha Darajada -buundooyinka(GPA):** GPA-du waa hab lagu cabiro guusha tacliinta. Waxaa lagu xisaabiyaa iyadoo la qaybinayo wadarta guud ee dhibcaha la kasbaday tirada fasalada ama buundooyinka la isku dayay, waxayna badanaa ku dhacdaa meel u dhaxaysa eber ilaa 4.0.
  o Darajooyinka shakhsi ahaaneed waxay inta badan ku salaysan yihiin miisaanka soo socda oo sidoo kale waxaa ku jiri kara calaamad lagu daray ama laga jaray, sida A+ ama A- taas oo muujinaysa wadarta dhibcaha ama dadaalka ardayga ee fasalka. Nidaamyada kale ee darajooyinka waxaa ka mid noqon kara nidaam ku-dhicitaanka ah oo aan ahayn darajooyinka xarfaha. Nidaamka saxda ah wuxuu inta badan ku xiran yahay degmada, maadada iyo fasalka.
    - A (Fiican) 90-100
    - B (Wanaagsan) 80-90
    - C (Dhexdhexaad) 70-80
    - D (Hoose) 60-70
    - F (Ku-dhacay) -60
- **Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEP):** Qorshe la habeeyey oo sharaxaya sida dugsigu u taageeri doono ardayga baahiyaha gaarka ah qaba.
- **K-12:** Eray la soo gaabiyey oo tilmaamaya xanaanada ilaa fasalka 12aad, gaar ahaan dugsiyada dadweynaha.
- **Ururka Waalidiinta Macallinka (PTA) ama Ururka Bulshada Macalinka iyo Waalidka (PTCO):** Urur ka kooban waalidiin, macalimiin, iyo shaqaale ka caawiya waalidiinta inay ka qayb qaataan dugsiga ilmahooda iyagoo u maraya hawlo ay ka mid yihiin lacag ururin, ka qayb qaadashada bulshada, iyo barnaamijyada dugsiga kadib.
- **Maamule:** Maamulaha darajada ugu sarreeya ee dugsiga.
- **Imtixaanka Jaangooska ah:** Dhamaan dugsiyada dawlada Maraykanku waxay soo saaraan imtixaannada gobolka oo dhan (sidoo kale loo yaqaan imtixaannada caadiga ah ama imtixaannada bartilmaameedka) si loo hubiyo in ardaydu ay gaarayaan heerarka looga baahanyahay ee waxbarashada. Dugsiyada sare, ardaydu waxay sidoo kale haystaan fursad ikhtiyaar ah inay qaataan imtixaanada caadiga ah ee looga baahanyahay buundooyinka kuleejka (sida imtixaanada Meelaynta Sare) ama taageera shuruudaha gelitaanka kuliyada (sida SAT ama ACT). Imtixaanada waxaa sameeya kooxo ka baxsan, sida degmada ama gobolka, kuwaas oo loo isticmaalo in lagu cabbiro horumarka waxbarasho ee ardayga.
- **Baahiyaha Gaarka ah:** Waa eray tilmaamaya ilmaha dugsiga eel eh baahiyaha gaarka ah, sida naafonimada waxbarashada ama xaaladaha caafimaadka. Ardayda leh baahiyaha gaarka ah waxay guud ahaan xaq u leeyihiin barnaamijyada waxbarashada gaarka ah.
- **Soo-Daahida:** Hadii ardaygu dugsiga ka daahdo, waxaa loo aqoonsan yahay daahid, waxaana lagu qori doonaa diiwaankooda ilaa uu cudurdaar ka keeno waalid ama mas'uul. Maqnaanshaha ama daahitaanka soo noqnoqda waxaa dabagal ku samayn doona shaqaalaha dugsiga.